



Farrintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Maajo 13, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Tallaalka oo hadda la helayo oo loogu talagalay qof kasta oo ay da'diisu tahay 12 san iyo ka weyn

Farrintani waa mid la socodsiinaysa qof kasta oo ka tirsan nidaamka adeeg ee naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD) in tallaalka COVID-19 ee Pfizer uu dhawaan Maamulka Cuntada iyo Daawooyinku (FDA) u oggolaaday qof kasta oo ay da'diisu tahay 12 sano iyo ka weyn.

Hay'adaha maamulka kiiska iyo daryeel bixiyayaasha taageera dhallinyarada qabta I/DD ee da'daasi ah waa in ay la xiriiraan oo ku xirmaan iyaga oo hayaan fursadaha dhanka tallaalka ee ka jira degaanadooda. Dadka taageera shakhsiyaadka qaba I/DD, oo ay ku jiraan xubnaha qoyska ka tirsan, asxaabta lagu kalsoon yahay iyo daryeel bixiyayaashu, waa in ay [wada hadal](#) qofka kala yeeshaan tallaalka COVID-19 si looga taageero iyaga in ay go'aan gaaraan.

[Xirmada tallaalka ee Maamulka Caafimaadka Oregon](#) ayaa leh ilo, ay ku jiraan goobaha tallaalka, macluumaadka 211, xaqiiqooyinka tallaalka iyo kuwo kale oo badan. Waxaa sidoo kale jira [qoraalka oggolaanshaha qofka da'da yar](#), oo tilmaamaya sida uu dhigayo sharciga Oregon, dadka da'da yar, ee da'doodu tahay 15 iyo ka weyn, in ay oggolaan karaan daaweyn caafimaad iyaga oo aan oggolaansho ka haysan waalid ama mas'uul. [Maamulka Caafimaadka Oregon](#) ayaa sidoo kale haya ilo iyo macluumaad loogu talagalay kooxdan da'eed.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.